**Qaramada Midoobey** **S/RES/1820 (2008)**

**Golaha Ammaanka**

Qeybin: Guud
19ka June 2008

# Go'aankii 1820

## Oo ahaa mid uu aqbalay Golaha Ammaanka shirkiisii 5916-naad ee June 19keedii 2008.

*Golaha Ammaanka*

*Isagoo aqoonsan* masuuliyadda joogtada ah iyo fulinta go'aankii 1325 (2000), 1612 (2005) and 1674 (2006) iyo markuu xusey war-saxaafadeedkii Guddoomiyaha ee 31 October 2001 (Golaha Ammaanka /PRST/2001/31), 31 Oktoobar 2002 (Golaha Ammaanka /PRST/2002/32), 28 Oktoobar 2004 (Golaha Ammaanka /PRST/2004/40), 27 Oktoobar 2005 (Golaha Ammaanka /PRST/2005/52), 8 Nofeembar 2006 (Golaha Ammaanka / PRST/2006/42), 7 Maarso 2007 (Golaha Ammaanka / PRST/2007/5), iyo 24 Oktoobar 2007 (Golaha Ammaanka/PRST/2007/40);

*Isagoo tixraacaya* ujeeddooyinka iyo mabaaddiida ku xusan Cahdiga Qaramada Midoobay,

*Isagoo isla markaana adkeynaya* mowqifyadii ka soo baxay Shirkii iyo Warbixintii Caalamka ee sannadkii 2005 ee lagu tirtirayey dhammaan dhibaatooyinka qaaska ah oo loo geysto haweenka iyo gabdhaha, oo ay ka mid yihiin joojinta wax ka qabasho la'aanta dambiilayaasha, iyo iyadoo la balanqaadayo badbaadinta shacabka, qaas ahaan waqtiyada ay socdaan dagalaada hubaysan, iyadoo waafaqsan masuuliyada dowladahu ay qaateen kuna xusan sharciyada gargaarka ee caalamiga iyo sharciyada xaquuq insaanka.

*Wuxuuna xusayaa* ballanqaadyadii ku jiray Baaqii iyo Barnaamij-Hawleedkii lagu gaaray magaalada Beking iyo go'aanadii ka soo baxay Fadhigii Sadex iyo labaatanaad ee gaarka ahaa ee Golaha Guud ee Qaramada Midoobey ee uu halku dhegisu ahaa "Haweenka 2000: Sinaanta Ragga iyo Haweenka, Horumar iyo Nabad la gaaro Qarniga kow iyo labaatannaad" (A/S-23/10/Rev.1), gaar ahaan kuwii ku saabsanaa kufsiga, fara-xumeynta iyo dumarka ku nool meelaha ay ka jiraan dagaallada hubeysan;

*Isla markaasna xusuusinaya* waajibaadka Dowladaha Saxiixey Heshiiskii Tirtirida Dhammaan Noocyada Takoorka lagu hayo Haweenka, iyo maamuska siyaasada

oo aan waajibka ahayn oo ku lifaaqan [Fursadda Hab-maamuuska ee the Optional Protocol thereto], Heshiiskii Qaramada Midoobey ee ku saabsan Xuquuqda Caruurta iyo [Fursadda Hab-maamuuska ee the Optional Protocol thereto], iyo isagoo ku boorinaya dowladaha aan wali saxiixin qodobadan inay saxiixaan ama ay adeecaan / fuliyaan.

*Isagoo xusaya* in shacabka ay yihiin kuwa intiisa badan saameeya dagaallada hubeysan, si qaas ahna dumarka iyo gabdhaha loogu geysto fara-xumeyn, loona isticmaalo xeelado dagaal oo lagu bahdilo, loogu awood sheegto, lagu cabsi galiyo, laguna bara-kiciyo shacabka, iyo qabaa'il gaar ah; iyo fara-xumeyntaas oo ay dhici karto in ay sii jirto kadib marka ay colaadaahaas dhamaadaan.

*Isagoo xusaya* caambarayntiisa ku wajahan dhammaan fara-xumeynta iyo dhammaan dhibaatooyinka loo geysto dadka rayidka ah xiliyada collaada, qaas ahaan dumarka iyo caruurta;

*Isagaa ku dhawaaqaya* ama muujinaya walwal xoog leh, sida joogtada ah uu u cambaareeyey xad-gudubyada loo geysto haweenka iyo caruurta waqtiyada colaadaha, oo ay ka mid yihiin fara-xumeynta dhaca waqtiyada colaadaha, iyo isagoo ugu baaqay dhammaan kooxaha ku lug leh dagaalda hubeysan in ay joojiyaan falalkaas ayna xaliyaan si aysan falalkaas u dhicin, iyo kuwaas oo dhicitaankooda noqdo falal nidaamsan systematic iyo baahsan, gaarana xeerar keena walaac iyo waxshinnimo.

*Isagoo ugu yeeraya* in lagu daro noocyo ka mid ah falalka fara-xumeynta Sharcigii Rome ee Maxkamadda Adduunka iyo sharciyada kale ee dambiyada adduunka (international criminal tribunals),

*Isagoo aqoonsan* kaalinta muhiimka ah oo ay haweenku ka qaataan ka -hortagga iyo xallinta dagaallada hubaysan iyo abaabulka nabadda, wuxuu isla markaana Goluhu adkeynayaa faa'iidada ay leedahay ka -qaybgalkooda iyo kaalintooda wax-ku-oolka ah ee kaga aaddan dhammaan tallaabooyinka loo qaado dhowrista iyo horumarinta nabadda iyo ammaanka, iyo baahida loo qabo in la kordhiyo kaalintooda xagga awood-go'aameedkooda ku saabsan ka hortagga iyo xallinta dagaallada,

*Isla markaasna ka walwalsan* carqaladaha iyo dhibaatooyinka saameeya ka qayb-qaadashada dumarka hababka looga hortago loona xalliyo dagaallada sababey colaadda, xabsigelinta iyo takoorka, ee yareeya dumarka awooddooda iyo xaqooda inay ka qayb-qaataan nolosha dambe marka ay colaadahu dhammaadaan, iyo in la aqoonsado dhibaatooyinka saameyn kara dib u dhisidda nabad waarta, ammaan iyo waan-waan, oo ay ku jirto nabad-dhisid marka ay colaaddu dhammaato,

*Isagoo aqoonsan* dawladaha oo idil in ay mas'uul ka yihiin difaacidda xuquuqul insaanka shacabkooda, iyo kuli shaqsiyadaha kale ee ku nool waddankooda iyagoo raacaya ama tixgalineya sharciyada adduunka,

*Isla markaana soo dhaweynaya* xiriir dadaal aan kala go'in inuu ka socda hay'adaha qaramada midoobay dhexdooda, loo calaamadeeyey wakiil u dhexeeye oo

bilaaba shaqadaas "Dhaqdhaqaaqa Qaramada Midoobey ee ka soo horjeeda Galmada Khasabka ah ee dhacda waqtiyada Dagaallada," saameeyana aqoonsanaan ku saabsan galmada khasabka ah ee dhacda waqtiyada dagaallada hubeysan iyo marka ay dhammaadaan dagallaada hubeysan iyo, uga dambeynta, in la joojiyo falalkaas,

1. *Isagoo sheegaya* in falalka galmada ee khasabka ah, markii loo isticmaalo siyaabo dagaal loogu talo galay in lagu waxyeeleeyo dad rayid ah ama ay noqoto nidaam baahsan oo lagu weeraro dadweynaha, oo si weyn uga sii dara colaadaha hubeysan oo hor istaagi kara dib u dhisidda nabadda adduunka iyo ammaanka, *wuxuuna aqoonsanayaa* in loo baahan yahay in la qaado tallaabooyin looga hortago laguna xalliyo falalka galmoodka ee khasabka ah oo ay kordhin karaan ilaalada nabadda adduunku iyo amniga, iyo *isagoo tusaya* sida uu diyaar ugu yahay, lana tixgaliyo xaaladahaas marka ay yihiin arrimaha looga hadlayo Golaha, kusocoda, meelba meesha looga baahan yahay, la qaado tallaabooyin habboon oo lagu xalliyo falalka galmoodka khasabka ah ee baahsan ama nidaamsan.

2. *Wuxuu ka dalbanayaa* kooxaha dagaallada iskula jira in ay si deg-deg ah u joojiyaan dhammaan falalka galmoodka khasabka ah ee loo geysto shacabka;

3. *Wuxuu ku amrayaa* kooxaha ku jira colaadaha hubeysan inay qaataan tallaabooyin habboon oo lagu difaacayo dadka shacabka ah, oo ay ka mid yihiin dumarka iyo gabdhaha, dhammaan falalka galmoodka khasabka ah galmo muquunis, oo ay ka mid yihiin, marka laga yimaado waxyaalaha kale [inter alia], in ay ayidaan tallaabooyin militeri habboon oo anshax leh si loogu xaqiijiyo qanuun mas'uuliyad xukun ah, ciidankana ku tababaraan sidii loo mamnuuci lahaa dhammaan falalka galmoodka khasabka ah ee loo geysto dadka rayidka ah, oo ay runta ka sheegaan quraafaadka ku saabsan waxyaalaha kallifa galmoodka khasabka ah, in kooxaha hubaysan iyo kuwa ammaanka ay si gaar ah ugu fiirsadaan arrintan ayna si taxadar leh u baaraan dhacdooyinka kufsi hore iyo kuwa la xiriira galmoodka khasabka ah, oo ay daad gureeyaan dumarka iyo gabdhaha qatarta u ah galmoodka khasabka ah meelo ammaan ah; wuxuuna ka codsanaya Xoghayaha-Guud ee Qaramada Midoobey, meesha ku habboon, inuu ku dhiiri galiyo wadahadal lagu xalliyo arrintan ayna noqoto arrin si baahsan kana mid ah xallinta colaadaha u dhaxeeya madaxda qaar ka mid ah Hay'adaha Qaramada iyo dhinacyada dagaalamaya,  si ay fiiro gaar ah u siiyaan marka lagu yimaado arrimaha kale [inter alia], ra'yiga dumarka la waxyeeleeyey oo ka soo jeeda degaano qaarkood;

4. *Isagoo xusuusan* in kufsiga iyo noocyada kale ee xadgudubyada galmada la xiriira, ay noqonayaan dambiyo dagaal, dambi loo geysto bin-aadamka, ama fal loo qaadan karo xasuuqid, *carrabkana ku adkeynayaa baahida loo qabo in* falalka galmoodka khasabka ah laga saaro dambiyada la saamaxo marka colaadahaa la

xallinayo, iyo *wuxuu ugu yeerayaa* dowladaha inay u hoggaansanaadaan mas'uuliyaddooda kaga aaddan sidii dembi loogu soo oogi lahaa ciddii falalkaas geysatay, si loo xaqiijiyo in dhibbanayaasha falalka la xariira galmada, khaas ahaan haweenka iyo gabdhaha, ay helaan magangelyo loona suurta geliya inay caddaalad helaan, iyo waxa kale oo uu *carrabka ku adkeynayaa* muhiimadda ay leedahay in la joojiyo cabsi la'aanta dadka falalkaas dembiga sameeyay inay ka mid tahay qeyb guud oo lagu raadiyo nabad waarta, caddaalad, run, iyo heshiis qaran;

5. *Isagoo xaqiijinaya* ujeeddadiisa, marka la asaasayo iyo marka la cusboonaysiinayo cunaqabateyn sharciyo dowladeed, iyadoo la tixgelinayo in la sameeyo sharciyo ku habboon oo ka soo hor jeeda kooxaha ka midka ah dagaallada hubeysan oo haweenka iyo gabdhaha ku sameeya kufsi iyo falalka la xiriira galmada xilliyada dagaallada hubeysan ay jiraan;

6. *Wuxuu codsanayaa* in Xoghayaha-Guud, isagoo la tashanaya Golaha Ammaanka, Gudiga Gaarka ah ee hawlaha Nabad-ilaalinta iyo Kooxihiisa Shaqo iyo Dowaladaha la xiriira, in la sameeyo lana dhaqangeliyo tababarro ku habboon mashaariicda nabad-ilaalinta iyo shaqaalaha gargaarka [samafalka] ee ay Qaramada Midoobey u dirtey shaqooyin ergo oo waajiibkaas Golaha [Ammaanka] siiyey si ay wanaagsan uga caawiso ka hortagga, aqoonsado kana jawaabo falalka la xiriira galmadda iyo noocyada kale ee falalka lidka ku ah shacabka;

7. *Isagoo ka codsanaya* Xoghayaha-Guud inuu wado siina xoojiyo dadaalada lagu dhaqan gelinaya sharci aan u dulqaadaneynin ka faa'iideysiga xagga galmada iyo xadgudub ka dhaca gudaha dhaqdhaqaaqyada Nabad-Ilaalinta ee Qaramada Midoobey; kuna guubaabinaaya ciidanka iyo booliiska ka soo jeeda waddamada bixiya ciidanku inay qaadaan taallaabooyin habboon oo ka hortagaaya, oo uu ka mid yahay ka hor inta aan ciidanka la geynin goobaha iyo marka ay joogaan goobaha dagaalkaba la siiyo tababarro aqoon kordhis ah, iyo tallaabooyin kale oo lagu xaqiijinayo mas'uuliyadnimo [xilsaarsid] lacala haddii ay dhacdo in shaqaalahoodu ay ku lug yeeshaan;

8. *Wuxuu ku guubaabinayaa* waddamada bixinaya ciidan iyo booliis, iyagoo la tashanaya Xoghayaha-Guud, in ay si tixgelin leh u qaataan tallaabooyin wax kordhin iyo wax qabadka shaqaalahooda ka tirsan hawlaha nabad-ilaalinta ee Qaramada Midoobey si loo ilaaliyo shacabka, oo ay ku jiraan haweenka iyo gabdhaha, kana hortagaan falalka galmada la xiriira ee loo geysto haweenka iyo gabdhaha ku nool meelaha dagaalladu ka jiraan iyo meelaha dagaalladu ay ka soo dhammaanayaan, mar-marka ay suurta gal noqoto in lagu daro dumar nabad-ilaaliyaal ah ama booliis ah oo tiro badan markii ciidan la geynayo goobahaas;

9. *Wuxuu ka codsanayaa* Xoghayaha-Guud inuu sameeyo qodobo iyo xeelado wax tar leh oo sare loogu qaadayo awoodda la xiriirta shaqooyinka nabad-ilaalinta ee Qaramada Midoobey, oo waafaqsan waajibaadkooda, si looga ilaaliyo shacabka, marka lagu daro haweenka iyo gabdhaha, dhammaan nooc kasta oo xadgudug oo la xiriira galmada iyo in lagu daro qoraalkiisa ku saabsan colaadaha loo diro Golaha Ammaanka aragtidiisa xalaadaha dagaal kuna saabsan difaacidda haweenka iyo gabdhaha iyo tallooyin la xiriira arrintaas;

10. *Isagoo ka codsanaya* Xoghayaha-Guud iyo hay'adda ku habboon ee Qaramada Midoobey, mid ka mid ah, la tashi lala yeesho haweenka iyo hay'adaha ay haweenku hoggaamiyaan inay tahay mid habboon, in la sameeyo qaabab wax tar leh oo lagaga badbaadinayo muquunis, oo ka mid ah qaas ahaan galmoodka khasabka ah, haweenka iyo gabdhaha ku nool gudaha iyo hareeraha xeryaha qaxootiga iyo barakacayaasha ay Qaramada Midoobey maamulaan, waliba sidoo kale in dhammaan hawl-gallada oo ay ku jiraan hub-dhigis, ruqseynta askartii dagaalka ka qeyb gashay, iyo dib u celin, iyo in waaxyaha caddaaladda iyo ammaanka dib loo habeeyo oo ay Qaramada Midoobey kaalmeyso;

11. *Isagoo carrabka ku adkaynaya* muhiimadda ay guddiga nabad-dhisiddu ka cayaari karaan oo ka mid ah xag talo iyo waano loogu talo galay nabad-dhisidda marka ay colaaduhu dhammaadaan, meesha ku habboon, habab lagu xalliyo galmoodka khasabka ah ee loo geysto waqtiyada iyo marka ay dagaallada hubeysani ay soo dhammaadaan, iyo in la xaqiijiyo la tashiga wakiilo matala haweenka ka tirsan hay'adaha shacabka oo waddan gaar ah ka jira kana tirsan qaybahaa, isla markaasna ka mid noqoto xeeladaheeda balaaran oo fiiriya arrimaha dhediggiyo laboodka ;

12. *Wuxuu u jeedinayaa* in Xoghayaha-Guud iyo ergadiisa qaaska ahi inay casuumaan haweenka si ay uga qeyb qaataan doodaha ku saabsan ka hor tagga iyo xallinta colaadaha, ilaalinta nabadda iyo amniga, iyo nabad-dhisidda kadib colaadaha, iyo iyadoo la dhiiri-gelinayo dhammaan kooxaha marka wada-hadalada nabad-dhisiddu ay socdaan si ay u fududeeyaan sinnaan iyo ka qaybgal buuxa si ay haweenku uga mid noqdaan heerka go'aan sameynta;

13. *Wuxuu codsanayaa* dhammaan kooxaha daneynaya, oo ay ku jiraan dowladaha ka tirsan, Qaramada Midoobey iyo shirkadaha maaliyadda, qaas ahaan nidaamyada sharciyada iyo caafimaadka, iyo shabakadaha hay'adaha shacabka ee deggaanka si loo siiyo kaalmo joogta ah [dheer] dhibbanayaasha la fara-xumeeyey xilligii dagaallada hubeysan iyo markii dagaalladaas ay soo yaraadeenba;

14. *Wuxuu soo jeedinayaa* urur goboleed iyo gobollo-hooseedku in ay qaas ahaan tixgeliyaan kobcinta iyo hirgelin siyaasad, dhaq-dhaqaaqyo iyo taageerid wax tar u leh haweenka iyo gabdhaha uu saameeyey galmoodka khasabka ahi waqtiyadii ay dagaallada hubeysani ay jireen;

15. *Wuxuu ka codsanayaa* Xoghayaha-Guud inuu u soo gudbiyo qoraal Golaha bisha June 30keeda, 2009, hirgelinta go'aankan oo saameynaya xaaladaha ku jira waxyaabaha Golahu qabto, uuna isticmaalo xog ogaalada diyaarka ah oo ka soo baxa Hay'adaha Qaramada Midoobey, oo ay ka mid tahay koox waddan, howlgallada nabad ilaalinta, iyo kuwa shaqaalaha Qaramada Midoobey, oo ay ku jiraan, arrimo kale, aqbaaraha dagaallada hubeysan oo sida balaaran ama guud ahaan galmood khasab ah loogu geysto shacabka; baaritaan baahsan iyo isbadel galmoodka khasabka ah ee dhaca xilliyada dagaallada hubeysani socdaan; dalabyo loogu talo galay xeelado lagu yareeyo nuglaashaha haweenka iyo gabdhaha muquunis (violence); calaamado lagu cabirro horumarka laga gaarey ka hor tegida iyo xallinta galmoodka khasabka ah; fikrado habboon oo ka imaanaya hay'adaha la shaqeeya Qaramada Midoobey kana adeega goobahaas; qorshihiisa xog-ogaaleed laguna fududeynayo ururinta xog-ogaallo waqtigiisa dhacaya, oo leh ujeeddo, sax ah, iyo kalsooni oo fiirinaya siyaabaha loo isticmaalo galmoodka khasabka ah waqtiyada dagaallada hubeysan, oo uu ka mid yahay sidii la iskugu duwi lahaa loona hagaajin lahaa hawlgallada ka jira goobaha ay Qaramada Midoobey joogaan iyo xaruntooda dhexe; iyo aqbaaro ku saabsan waxqabadyada ay sameeyaan kooxaha ka tirsan dagaallada hubeysan fuliyaan maas'uuliyaddooda lagu muujiyey go'aankan, qaas ahaan in ay si dhaqsi ah ay gebi ahaan u joojiyaan dhammaan falalka galmoodka khasabka ah iyo inay qaadaan tallaabooyin habboon oo looga difaaco haweenka iyo gabdhaha dhammaan falalka galmoodka khasabka ah;

16. *Wuxuu go'aansaday* in uu arrimahan si firfircoon oo joogta ah ula socon doono.